

# Kobcinta Dhaqaalah

## Rejo-Abuurka Bulshada Soomaaliyeed





04



MASHAARIICDA  
BIYAH A IYO  
FAYADHOWRKA

06



ADEEGYADA IYO  
HAWLAHA SAMAFAL  
EE CAAFIMAADKA

07



MASHAARIICDA  
DHISMAHA

08



MASHAARIICDA  
XOOGSI XALAAL AH

09



MASHAARIICDA

10



HAWLAHA  
WAXBARASHADA



**Address:** Barbera Road - Hargeisa  
**Mobile:** +252633278253  
**Phone:** +252514333  
**E-Mail:** somalia.office1@gmail.com  
**Website:** www.arcosm.org

مساراًت  
خيرية CHARITABLE PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO  
HAYADDA GARGAARKA AFRICA  
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO  
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED  
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (30) FEB 2024



## MASHAARIICDA BIYAH IYO FAYADHOWRKA



### ARC OO DHAMMAYSTIRTAY CEELAL BIYOOD KU FILAN 150 QOYS

Waxaa dhammaaday hirgelinta saddex ceel biyood oo ay ARC ka hirgelisay deegaananda Galweyn, Marka iyo Buulomareer oo ka tirsan gobalka Shabeelaha hoose ee Soomaaliya.

Ceelashan mid kasta jooggiisu waa 15m, waxa aanu leeyahay dabool iyo qaybaha sare oo sabbad ah, darka xoolaha laga waraabiyo iyo qalabka biyo-saarka ee gacanta.

Maamulaha xafiiska Muqdisho ee ARC, Mudane Maxamed Cali Geelle oo ka hadlay munaasabadda xadhig ka jarka

ceelashan ayaa faahfaahiyey muhiimadda ay leedahay, in 150 qoys ay helaan biyo cabbitaan ku habboon. Wuxuu aanu hoosta ka xariiqay, in mashruucani uu qayb ka yahay Barnaamijka biyaha iyo fayadhowrka ee ay ARC ka fuliso deegaannada oomanaha ah.

Barnaamijka biyaha iyo fayadhowrka ee ARC, yoolkiisu waa in biyo nadiif ah la gaadhsiiyo dadka saboolka ah ee ku dhaqan deegaannada biyuhu ku yaryihii gaar ahaan xilliyada abaaraha. Wuxaana maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



## ARC AYAA DHAMMAYSTIRTAY CEELAL RIIG OO KU FILAN 1500 OO QOYS

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa xadhiga ka jartay saddex riig oo ay ka qodday deegaannada, duleedka magaalooinka Hargeysa, Muqdisho iyo Garowe. Ceelashan ayaa qayb libaax ka qaadan doona kor u qaadista adeegga biyaha ee bulshada ku dhaqan deegaannadan.

Dr. Cabdiraxmaan Almucalimi, maamulaha guud ee hay'adda ARC oo ka hadlay hirgelinta ceelashan, waxa uu sheegay in ay dabooli doonaan baahiyaha biyood ee ugu yaraan 1500 oo qoys, "Waxa ay qayb ka yihin dadaallada ay ARC ku xoojinayso suurtagalinta in muwaadiniintu ay helaan biyo nadiif ah, la cabbi karo, la isku hallayn karo, isla markaana gaadhistroodu

fududahay" ayaa uu yidhi Dr. Mucallimi. Isaga oo intaas ku daray, in mashruucani uu ka mid yahay Barnaamijka weyn ee biyaha iyo fayadhowrka ee ay ARC sida joogtada ah uga fuliso, deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Gaar ahaan deegaannada oomanaha ah, ama biyaha gaadhitaankoodu adagyahay. Maamuluuhu waxa uu u mahadnaqay masuuliyiinta ay mashaariicdani khuseeyaan ee Somaliland iyo Soomaaliya, isaga oo sheegay in ay gacan weyn ka geystaan fududaynta hawlahaa mashaariicda ay hay'addu fuliso. Barnaamijka biyaha ee ARC, waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



## ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA



### MUNAASABADDA MAALINTA QARANNIMADA KUWEYT AWGEED, ARC WAXA AY FULISAY OLOLAYAAL CAAFIMAAD

“Kuweyt ayaa idin garab joogta” waa halkudhegga oole samafal caafimaad oo ay hay’adda Gargaarka Afrika (ARC) ka fulisay deegaanno kala duwan oo gobalka Geeska Afrika ka mid ah. ololahan oo lagu beegay xuska maalinta qarannimada dalka Kuweyt, waxa uu ka koobnaa afar kolonyo oo dhakhaatiir takhasusyo kala duwan ahi ay ku tageen deegaanno ka mid ah magaalooyinka Hargeysa iyo Burco ee Somaliland, iyo Garoowe, dawladda Puntland.

Dhakhaatiirtan ayaa adeegyo caafimaad oo isugu jira waraysi iyo la talin, Shaybaadh, iyo daweyn takhasusyo kala duwan ah u sameeyey bukaan ay tiradoodu gaadhayso 1000 qof oo isugu jira dad waaweyn oo haween iyo rag waayaala ah, iyo carruura..

Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, aamulaha guud ee ARC oo ololahan caafimaad ka hadlay ayaa dawladda Kuweyt ku

bogaadiyey dadaallada ay ku kaalmada bani’ aadamnimo ku siiso bulshada Soomaaliyeed. Waxa aanu hambalyo u diray dawladda Kuweyt oo maalinta qarannimadeeda 25-26 Jeenaweri lagu beegay kaalmadan caafimaad.

Ka faa’idaystayaasha barnaamijkan oo dareenkooda cabbiray ayaa dawladda Kuweyt ku bogaadiyey adeegyada caafimaad ee ay soo gaadhsiisay, waxa aanay Alle uga baryeen in uu ammanka iyo horumarka uga dhigo mid waara.

Ololahan ayaa qayb ka ah barnaamijyo samafal oo ay dawladda Kuweyt joogto u gaadhsiiso dadyawga u baahan ee dunida, sannad kastana waxaa ka faa’idaysta boqollaal Soomaaliyeed oo ku dhaqan deegaannada gobalka Geeska Afrika, kuwaas oo aan awoodayn in ay iska bixiyaan kharashaadka qaaliga ah ee takhasusyada qaarkood.



## MASHAARIICDA DHISMAHA



## HAWSHA DHAMMAYSTIRKA XARUNTA AMAL EE BOORAMA OO MEEL FIICAN Maraysa



Waxaa weli si firfircoo u socota hawsha dhammaystirka dhismaha, xarunta caafimaadka ee AMAL oo ka socda Boorama. Waa Mashruuc ay dedejintiisu muhiim tahay, marka la eego baahida daran ee bulshadu ay u qabto adeegyo caafimaad oo casri ah.

Magaalada Boorama ee xarunta gobalka Awdal, waxa ay ka mid tahay deegaannada ay ARC muddada dheer ka wadday, adeegyada caafimaad iyo mashaariic kale oo waxbarasho iyo guud ahaan arrimaha samafalka la xidhiidha.

Mashruucan waxaa caawinaya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanu qayb ka yahay barnaamijka samafalka caafimaadka ee ARC oo ka socda deegaanno kala duwan oo Geeska Afrika ah.

ARC waxa ay hore xarumo caafimaad iyo cisbitaaloo uga dhistay, kana shaqaysiisaa deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



# KOBCINTA DHAQAALAH

## Rejo-Abuurka Bulshada Soomaaliyeed

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) waxaa ka go'an sii wadista dadaalalda ay ku xoojinayso daryeelka iyo kor u qaadista fursadaha nolol wanaagsan loogu raadinayo bulshada Soomaaliyeed gobalka Geeska Afrika. Si ay taas u gaadho waxa ay fulisaa barnaamijyo iyo mashaariic waaweyn oo raad muuqda ku yeeshaa bulshada dhaqaalaheeda iyo koboca noloshooda.

Kobcinta waxsoosaarka bulshada

Meelaha ay mashaariicdani xoogga saarto waxaa ka mid ah; in dhalinyarada wiilal iyo gabdhaba loo diyaariyo suuqa shaqada, iyada oo la siinayo xirfadaha farsamada gacanta iyo qalabkii ay ku shaqa tegi lahaayeen. Wuxuu kale oo ka mid in loo maageliyo meherado ganacsi oo yaryar, sida dhismaha Tukaamo goodhiyo yaryar ah ama miisas iyo kaariyoonaayaal, isla markaana loo saarayo badeecadaha iibka Koowaad ee raasamaalka u noqon kara ganacsigaas. Waxaa iyaguna jira mashaariic lagu xoolaynayo dadka reer baadiyaha ah ee ay abaaruhu xoolaha ka saaraan, kuwaas oo la siinayo xolo dhaqasho ah oo irmaan, maqashoodiina wata, si ay uga faa'idystaan subagga, caanaha, iyo tartantaba.

Mashaariicda wanaajinta nolosha dadka waxaa iyaguna ka mid ah in la dhiirrigeliyo waxbarashada, sida dhismaha iyo diyaairnta dugsiyada waxbarashada iyo ka shaqaysiintoodaba, iyo in bulshada saboolka ah laga caawiyo adeegyada caafimaad ee aanay kharashkooda jari karin.

**Jaalka guusha**

Hay'adda ARC si ay uga midho dhaliso mashaariicdeeda wanaajinta iyo horumarinta nolosha bulshada, waxa ay caawimo ka heshaa hay'ado iyo jimciyado deeqbixiyeyaa ah, waxa aanay jaal la tahay hay'ado iyo ururro samafal oo ay iska kaashadaan hirgelinta iyo fulinta mashaariicda iyo barnamaijyada ay fuliso. Waxaa ka mid ah hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt oo ay tahay wakiilkeeda rasmiga ah ee gobalka Geeska Afrika.

**Gunaanad**

Yoolka ugu weyn ee Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) waa in ay raad riiq dheeraada ku yeelato nolosha bulshada Soomaaliyeed, kaalin mug lehna ka gasho rejo abuurka mustaqbalka muwaadinka danyarta ah.



## Haween Ah Oo Ka Faa'idaystay 35 Mashruuca Tababarka Xirfadaha

35 haween ah oo ka soo jeeda qoysaska hayntoodu yartahay ee magaalooinka Hargeysa iyo Muqdisho, ayaa dhammaystay Barashada xirfadha dawaarka iyo tolmaha dharka. Waxa ay qaateen tababar la xidhiidha tolmaha, jarjaridda iyo nashqadda dharka, iyo guud ahaan farsamada dawaarka. Markii ay dhammaysteenna waxaa la guddoonsiyyey makiinadaha dawaarka, nooca casriga ah ee korontada ku shaqeeya.

Mudane Xuseen Mutawalli, maamule ku xigeenka hay'adda ARC ee dhinaca barnaamijyada, ayaa isaga oo ka hadlayey mashruucan waxa uu bogaadiiyey dadaalka dhinacyada ay khusaysaa ay u galeen in uu guulaysto. Waxa aanu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leeyihiiin mashaariicda

lagu xoojinayo awoodaha iyo aqoonta haweenka, looguna diyaarinayo fursadaha shaqo. Isaga oo sheegay in ay taasi qayb weyn ka qaadanayso wanaajinta xaaladda nololeed ee qoyska, iyo kor u qaadista kaalinta ay gabadhu ku leedahay bulshada dhexdeeda.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka ‘Xoogsi xalaal ah’ oo ujeeddadiisu ay tahay in dadka loo abuuro mashaariic, iyo xirfado ay iyagu dakhligooda kala soo baxaan, si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda. Mashruucan oo waafaqsan Yoolka Qaramada Midobey ee ‘Horumarka Waara (SDG), waxaa maalgelisa hay'adda caalamgia ah ee ALRAXMA Kuweyt.



## WAXBARASHADA



### Arday Ka Faa'idaystay Barnaamij Noociisu Dalka Ku Cusub Yahay Oo ARC Ay Ugu Talagashay Bisha Soon



120 arday oo laga keenay goballada Somaliland iyo dawlad-deegaanka Soomaalida ayaa dhammaystay, kooras xiftiga Qur'aanka iyo barbaarinta toosan ee Islaamka ah oo ay 25 maalmood ugu xaraysnaayeen xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa. Barnaamijkan Ramadaanta loogu talagalay, waxaa ardaydan fursad loo siiyey in ay waqtii buuxa u helaan xafidista Qur'aanka iyo casharro la xidhiidha anshaxa wanaagsan iyo akhlaaqda islaamka, horumarinta nafta, Wacdi iyo waano diiniya oo culimada dalka ugu waaweyn loo keenay, maawelo, Jimicsi jidh-dhis, iyo ku tababarista iyo ku dhiirrinta fagaare ka hadalka iyo in bulshada wax loo sheego. Ardaydan ayaa muddadaas marti u ahaa xarunta Kuweytiga oo noloshooda iyo hoygoda damaanad qaadday.

Waxa uu ahaa barnaamij noociisa markii ugu horreysay dhulka Soomaalida lagu qabtay, waxa aanay ujeedadiisu ahayd in carruurtan la siiyo waqtii ay u khalaaweeyaan xiftiga Qur'aanka iyo Barashada diinta islaamka. Sida oo kale waxa ay u ahayd fursad dal-barasho, isdhexgal bulsho, iyo in ilmaha lagu abuuro kalsooni ah in uu isku filnaan karo, iyada oo aanu ka baydhayn jidka toosan ee islaamka iyo

anshax wanaagsan ee uu guriga iyo dugsigaba ku bartay.

Munaasabad lagu soo xidhayey barnaamijkan oo lagu qabtay xarunta Kuweytiga, waxaa ka soo qaybgalay wasiirka waxbarashada iyo Sayniska mudane Dr. Axmed Aadan Buuxane, iyo wasiirka Awqaafta iyo arrimaha diinta Sheekh Maxamed Xaaji Aadan Cilmi, guddoomiyaha bangiga dhexe ee Somaliland, Eng. Cali Cabdilaahi Daahir, Sheekh Almis Xaaji Yaxye Ibraahim, iyo masuuliyiin iyo marti sharaf kale oo kala duwan.

Xarunta Kuweytigu waxa ay ka mid tahay mashaariicda waxbarashada ee hay'adda gargaarka Afrika, iyada oo ay maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt. Waxaana munaasabadda Khadka maqal iyo muuqaalka ah ee Internet ka kaga soo qaybgalay Isu duwaha Afrika ee hay'adda ALRAXMA oo ku sugaran dalka Kuweyt

Masuuliyiinta munaasabadda ka hadlay ayaa dhammaantood iska dabamaray Bogaadinta barnaamijkan oo dalka ku cusub, waxa aanay hambalyo iyo ereyo dardaaran ah u jeediyeen ardayda ka faa'idaysatay.



## MAAMULAHAD GUUD EE ARC OO KORMEERAY MASHAARIICDA AANNU KA WADNO PUNTLAND



Dr.Cabdiraxmaan Almucallimi, maamulaha guud ee ARC ayaa booqasho u kuurgelis ah ugu tegey mashaariicda kala duwan ee ay hay'addu ka waddo deegaanno ka mid ah dawladda Puntland. Booqashada oo qaadatay muddo Afar maalmood ah, mashaariicda uu Dr. Mucallimi ku soo indha indheeyey waxaa ka mid ah, xarunta waxbarashada iyo daryeelka agoonta ee Al-Amal oo magaalada Garowe ku taalla. Waxa aanu u kuurgalay habsami u socodka hawlaho samafal ee xarunta, isaga oo warbixinno kala duwan ka dhegeystay masuuliyiinta waxbarashada, hoyga agoonta iyo ardayda. Xarunta Al-Amal waxaa ku jira 127 ardady oo ka hela daryeel nololeed iyo waxbarasho.

Waxa kale oo uu maamuluhu u guurgalay habsami u socodka xarunta caafimaadka Al-Haajiri, Garowe oo ka mid ah Barnaamijyada caafimaad ee ay ARC

ka waddo gobalka Geeska Afrika, qaxa uu ka qaybgalay munaasabad ardayda lagu barayey muhiimadda ilaalinta iyo daryeelka deegaanka, si taas loo dhiirigeliyana ardaydu 120 geed ayaa ay ku beertay barxadda xarunta.

Waxa kale oo uu maamuluhu goobjoog ka noqday munaasabad lagu maamuusayey ardayda kaalmaha sare kaga jiray, waxbarashada xarunta. Dhinaca kalana waxa uu booqasho ku tegey xarunta barakacayaasha, isaga furay obole caafimaad oo ay ARC ka fulinaysay xaruntan, iyo ceel ay hay'adda ka hirgelisay xerada.

Maamulaha waxaa booqashada ku wehelinyey, madaxa Barnaamijyada waxbarashada ee ARC, Mudane Muxamed Cabdalwahaab, iyo maamulaha xafiiska Puntland ee hay'adda, Mudane Maxamed Cabdalqaadir.





@africanreliefco



**Address:** Barbera Road - Hargisa

**Mobile:** +252633278253

**Phone:** +252514333

**E-Mail:** somalia office1@gmail.com

**Website:** www.arcosom.org

